

# Xayiraadaha lamahuraanka ah

Tallaabooyinka caafimaadka bulshada ee khasabka ah ayaa ka socda guud ahaan Alberta si loo yareeyo faafitaanka COVID-19 loona ilaaliyo nidaamka caafimaadka.

## Kulanno

### Kulamada gudaha

Dhamaan kulamada bulshada ee gudaha lama ogola.

- Dadka keligood nool iyo waalidiinta ee kaliya la nool carruurta ka yar 18 sano jir waxay dooran karaan laba qof oo ay booqan karaan inta lagu jiro xayiraadahaas.

### Isu imaashaha banaanka

Dhamaan kulamada bulshada ee dibada waxay ku kooban yihiin 10 qof ugu badnaan waana inaysan laheyn isu imaatin gudaha ah.

### Aroosyada iyo aaska

Dhamaan soo dhaweynta aroska iyo adeega aaska lama ogola.

- Xafladaha aroska waxay ku kooban yihiin 10 qofood.
- Howlaha aaska waxaa lagu soo koobay 20 qof.

### Goobaha cibaadada

Dhamaan goobaha cibaadada waxay kuxiranyihiin 15% degaanshaha lambarka dabka ee imaatinka qofka.

- Xirashada maaskaro waa lama huraan.
- Dadka kasoo jeeda hal guri waa inay u jirsadaan laba mitir dadka guryaha kale mar walba.

## Af xirashaha

Maaskarada waa lama huraan dhammaan meelaha dadweynaha ee gudaha, goobaha shaqada iyo goobaha cibaadada.

## Kasoo shaqeynta guriga

Ka shaqeynta guriga waa waa lama huraan haddii loo shaqeeyo u baahan yahay joogitaanka qofka shaqaalaha inuu si wax ku ool ah u shaqeeyo.

## Xayiraadaha ganacsiga

### Madadaalada iyo goobaha madadaalada

Goobaha madaddaalada waa inay xirnaadaan. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah tiyaatarada, baararka, meelaha lagu caweeyo iyo matxafyada. Maktabadaha waa inay xirnaadaan. Hoolalka bulshada, xarumaha shirarka iyo goobaha lagu nasto ee gudaha waxaa loo furi karaa waxqabadyo hadda la oggol yahay.

### Adeegyada cuntada

Makhaayadaha, baararka, meelaha lagu nasto iyo mehradaha ayaa loo furi karaa in laga qaato, jidka dhiniciisa laga qaato, loo geyn karo ama dibada lagu cuno, ayadoo xayiraado leh. Qofka ma ku cuni karo dudaha mana la ogola.

### Adeegyada tafaariiqda

Dhammaan adeegyada tafaariiqda iyo suuqyada laga dukaameysto waa inay yareeyaan tirada macaamiisha illaa 15% degganaanshaha lambarka dabka, oo aan lagu darin shaqaalaha.

### Adeegyada caafimaadka iyo xirfadeed

Adeegyada caafimaadka iyo xirfadeed waxay ku furmi karaan ballamo kaliya oo qof qof. Dhammaan tilmaamaha caafimaadka bulshada iyo waaxda waa in la raaco. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah dhakhaatiirta ilkaha, dhakhaatiirta indhaha, daaweeyayaasha, khubarada ilbadaha jirka lagu daaweeyo, qareennada iyo xisaabiyeyaasha.

## **Adeegyada gaarka ah iyo fayoaqabka**

Adeegyada gaarka ah iyo fayoaqabka waxay u furmi karaan ballamaha kaliya oo qof qof kaliya ah. Dhammaan tilmaamaha caafimaadka bulshada iyo waaxda waa in la raaco.

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah timo qurxinta iyo ciddiyahaa, adeegyada qurxinta iyo daaweynta duugista.

## **Waxqabadka, isboortiga iyo dhaqdhaqaaqa jirka**

Casharada waxqabadka kooxda, isboortiga kooxda, iyo fasalada jimicsiga lama ogola. Tababbarka jimicsiga ee qof qofka ah ayaa la oggol yahay, oo leh xaddidaadyo.

Dhalinyarada iyo isboortiga, madadaalada iyo waxqabadka (10 kaqeybgalayaal ugu badnaan) waa la ogolyahay, oo leh xaddidaadyo.